

Uur ma leedahay mise waalid cusub ayaad tahay?



Wax ka baro xuquuqdaada
goobta shaqada.

Hambalyo!

Minnesota gudaheeda, dhowaan-noqdayaasha, waalidiinta cusub iyo kalkaaliyayaasha waxay leeyihiin ilaalin sharci ah oo ka caawisa inay ku ilaaliyaan ammaan iyo caafimaad goobta shaqada.

Taasi waxay ka dhigan tahay inaad xaq u leedahay inaad u shaqeyso si nabadgelyo ah inta aad uurka leedahay iyo inaad iskaga listo caanaha naaska markaad shaqada ku soo noqoto.

Ogow xuquuqdaada. Hadal. Badiyaa loo shaqeeyeyaashu waxay diyaar u yihiin inay u hoggaansamaan sharciyada taageera shaqaalahooda uurka leh iyo kuwa kalkaaliyayaasha ah. Haddii aysan rabin, waan ku caawin karnaa.



Sharciyo gobolku leeyahay oo gargaara
waalidiinta shaqeeya iyo qolyaha shaqada
ayaa daboolaa saddex qaybood:

1. Uurka shaqada

2. Uurka ama fasaxa waalidnimo ee shaqada

3. Caano iska lisidda shaqada



1. Uurka shaqada

Caafimaadka ku ahaanshaha shaqada waa muhiim markaad uur leedahay, adiga iyo ilmahaagaba. Haddii aad uur leedahay, xaq ayaad u leedahay inaad codsato, loo shaqeeyahaaguna waa inuu ku siiyaa:

- ◆ Fursado ama waqti dheeraad ah si aad musqusha u isticmaashid, cuntayso ama biyo cabtid;
- ◆ fadhiga; iyo
- ◆ xaddidaya qaadista in ka badan 20 pounds.

Waxaad xaq u leedahay inaad codsato isbeddelo kale oo goobta shaqada ah marka aad ka hesho talo daryeel-bixiye caafimaadka ama taakulayso. Tani waxay u baahan kartaa inaad kala hadasho shaqo-bixiyahaaga wixii ku saabsan codsigaaga.

Isbeddelada kale waxaa ka mid noqon kara beddello ku-meel-gaadh ah oo ah u wareejin shaqo ka dhib yar ama ka khatar yar, beddelaad sacaadaha shaqada ama hawlaha fasaxa.

Waxaa jiri kara waxyaabo ka reeban oo ku saabsan shuruudaha loo shaqeeyahaan.

Wanaagsan in la ogaado:

Cidda aad u shaqayso kuma weydiisan karaan inaad wax ka beddesho xaaladahaaga shaqo maadaama aad uur leedahay.

2. Urka ama fasaxa waalidnimo ee shaqada

Sharci ahaan, waxaad qaadan kartaa 12 toddobaad oo fasax ah oo lacag la'aan ah inta lagu jiro ama kadib uurka. Si ka duwan Sharciga Fasaxa Qoyska iyo Caafimaadka ee dawlada federalka, waxaad xaq u leedahay fasaxaan iyada oo aan loo eegin intee le'eg yahay loo shaqeeyaha ama inta wakhtiga aad u shaqeysay loo-shaqeeyahaas.

Urka ama fasaxa waalidnimo ee shaqada ayaa loo qaadan karaa:

- ◆ awood la'aan uur awegeed ama xaaladaha caafimaad; ee la xiriira;
- ◆ dhalmada ama korsashada; ama
- ◆ wakhtiga is-laxawsiga ee waalidka ilmaha dhalay ama kan aan dhalin ee korsiga u qaata ka dib dhalashada ilmaha.

Waad dooran karta marka fasaxu bilaabanayo, laakiin waa inaad ku qaadaata 12 bilood gudahood laga billaabo taariikhda dhalashada ama korsashada. Fasaxa xadiga uu le'eg yahay laguma yarayn karo fasaxyada loo qaato daryeelka dhalmada ka hor. Muddadaas 12 bilood gudaheed, haddii sharciga shirkadda loo shaqeeyahaagu kuu ogolaato wa isticmaali karta fasaxa jirada ama fasaxa naafada, haddii aad jiran tahay xiliga uurka ama inaad ka bogsato dhalmada ka dib.

Wanaagsan in la ogaado:

Sharciga fasaxa qoyska iyo caafimaadka ee Minnesota, wuxuu dhagan galaya Jan. 1, 2026. Sharcigaasi waxa uu bixinayaa waqti fasax ah inta lagu jiro ama ka dib muddadda uurka.

3. Caano iskaga lisidda shaqada

Naasnuujintu waxay wanaajisaa fayooabaanta waxayna yareysaa kharashyada daryeelka caafimaadka. Haddii aad go'aansato inaad iskaga listo caano goobta shaqada, loo-shageeyahaagu iyaadoon loo eegin tirada shaqaalaha waa inuu ku siiya:

- ◆ waqti nasasho si aad iskaga listo caanaha; iyo
- ◆ meel nadiif, amman ah uugaar loo leeyahay in lagu muujiyo caano oo:
 - aan ahayn musqul;
 - waxaa laga gaashaamanayaa aragtida;
 - aad ugu dhow goobta shaqada;
 - waa mid ka madax banaan faragalinta shaqaalaha iyo shacabka; iyo
 - marin u leeyahay marin koronto.

Waxaa jiri kara waxyaabo ka reeban oo ku saabsan shuruudaha loo shaqeeyahaan.

Si uu waafaqsan baahidaada ayaad uu qaadan karta wakhtiga nasasho ah si aad caanaha iskaga lisidda. Waxaad caanaha iskaga lisi karta wakhtiga fasaxa ee jira, sida xiliga nasashada ee aan la bixin ama wakhti kale.

Wanaagsan in la ogaado:

Loo shaqeeyahaaga ma yarayn karo mushaharkaaga ama kugu qasbi karo inaad kabto wakhtige add iskaga listo caano inta shaqada ad ku jirto.

Sida loo bilaabo hadalka

Diyaar ma u tahay inaad la wadaagto wararka loo shaqeeyahaaga? Raac tilmaamahan.

Ha sugin. Ku bilow wadahadalka goor hore si aad u caawiso naftaada iyo cida aad u shaqayso.

Noqo mid wanaagsan. U soo dhawaaw warka sida guul-wadaaga adiga iyo loo shaqeeyahaaga labadaba.

Hadal. Waa caadi in loo sheego loo shaqeeyahaaga baahiyahaaga iyo xuquuqdaada.

Keen qof kula shaqeeya. Waxaa laga yaabaa inaad rabto inaad keento shaqaale aad wada shaqaysaan si uu ugu qayeb qato doodaha ku saabsan baahidaada iyo xuquuqdaada.

La wargaliyo. La wadaag buug-yaraha loo-shaqeeyahaaga, maareeyaha shaqaalaha, shaqaalaha ku la shaqeeya ama u doodayaasha goobta shaqada.

Ogow xuquuqdaada. Loo-shaqeeyaha waa in ann uga aargudan shaqaalaha, ama qaadan tallaabo xun, haddi shaqaala codsado xxuquuqda uu sharciga siiyey.

Haddii aad cabsi ama walaac aad ka qabto inaad si toos ah ula hadasho loo shaqeeyahaaga, nala soo xidhiidh si ann ku caawino.

Wanaagsan in la ogaado:

Takoorka uurka awgiis waa mamnuuc hoos timaada Xeerka Xuquuqda Aadanaha ee Minnesota iyadoon loo eegin baaxadda loo shaqeeyaha.

Xagee loo aadaa taageero dheeraad ah

Nala soo xiriir:

- ◆ haddii aad su'aalo qabto ama aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah;
- ◆ haddii loo-shaqeeyahaagu aanu doonayn inuu u hoggaansamo sharciga.

Waxaan halkaan u joognaa inaan ku caawino - iyo inaan ilaalino xuquuqdaada!



Labor Standards

443 Lafayette Road N.

St. Paul, MN 55155

651-284-5075

800-342-5354

dli.mn.gov/newparents

dli.laborstandards@state.mn.us